

ISBEDELADA ADEEGYADA DADKA SOOGALOOTIGA EE MAGAALADA TAMPERE EE KA DHASHAY XAALADA KORONA FAYRAS

Adeegyada Dadka Soogalootiga ee Magaalada Tampere ayaa ku hawlgalayay meel xafiiska kabaxsan. Waqti xaadirkan, waxaan macaamiisheena ugu adeegnaa khadka tooska ah, taleefan iyo/ama iimaylo. Fadlan la soco in dhammaan munaasabadaha iyo hawla kooxeedyada la joojiyay ama dib loo dhigay.

Adeegyada Soogalootiga ee Shaqada Bulshada Dadka Waaweyn ayaa qabata shirarka macmiilka ee muhiimka ah iyo booqashooyinka guriga, adeegyada intooda kale waxaa lagu qabanayaa wicitaanka taleefoonka. Kototori oo ku taal Hervanta ayaa xiran illaa iyo amar dambe.

- Eeg [jadwalka](#) adeegga latalinta luuqadaha kala duwan ee Adeegga Bulshada

Xarunta Macluumaadka Socdaalka, Mainio waxay ku bixisaa tallooyin luuqadahiina badan ee kala duwan iyada oo la adeegsanaysa telefoonka, emaylka ama codsiga "Neuvoo" (Bog internet oo shaqa laga raadsado)

- Macluumaadka xiriirka lataliyaha luuqadaha kala duwan waxaa laga heli karaa www.tampere.fi/mainio
- Kula xiriir iimayl: mainio@tampere.fi
- Kala soo dag appka 'Neuvoo' [Google Play Store](#) ama [App Store](#)
- Kala soco macluumaadki ugu dambeeyay [Bogga Facebook ee Mainio](#)



Xarunta Xirfadaha Caalamiga ah ee Tampere ayaa ku sii hawlgali doonta qaab xafiiska kabaxsan.

Haddii aad ballan leedahay ama aad talo u baahan tahay, la xiriir tababarahaaga. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Xirfadda adiga oo ka wacaya lambarka Adeegga Soodhaweynta oo ah 041 730 1407 ama iimayl ugu diraya osaamiskeskus@tampere.fi.

Qiimaynta xirfadaha ee xarunta Xirfadaha Soogalootiga waxaa lagu sameenayaa wicitaanka telefoonka iyo internetka.

Waxaad u baahan doontaa taleefan, kumbuyuutar ama tablet si aad uga qeybqaadato qiimaynta xirfadaada.

- Iska diiwaangeli tababarahaada
- La-taliyaha Ardayda, Outi Lahtinen ayaa la xiriira qof kasta oo isdiiwaangaliya, wuxuuna ku hagi doona sameynta qiimaynta xirfadda, lambarka taleefoonka. +358 44 4811 237

International HUB Tampere ayaa u adeegta macaamiisha shirkadaha iyo shaqo doonayaasha caalamiga ah sida caadiga ah.

- Kala xiriir +358 41 730 2769 ama iimayl ugu dir info.tamperehub@tampere.fi.
- Macluumaadka adeegyada caalamiga ah ee magaalada Tampere waxaa lagu heli karaa luuqada Ingiriisiga www.internationaltampere.fi

Waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino. Fadlan haka labalabeenin inaad nala soo xiriirto haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyadeena. Waan kula soo socodsiiin doonaa isbedel kaste oo lagu sameeyo boggeena internetka iyo/ama boggageena baraha bulshada.

Hagaha luuqadaha badan ee magaalada Tampere ee ku saabsan korona fayraska waxaa laga heli karaa: www.tampere.fi/coronavirus

Salaan,
Adeegyada Dadka Soogalootiga ee Magaalada Tampere

